# Soomaaliya: Dambiyada Dagaal ee Halakeeyey Dadweynaha

***Siyaasadaha Dhicisoobay ee Quwadaha shisheeye oo sii xumeeyay qalalaasaha***

(Nairobi, December 8, 2008) – Dhammaan dhinacyada ku lugta leh khilaafka sii holcaya ee Soomaaliya waxay sannadkii la soo dhaafay si joogto ah u gaysteen dambiyo dagaal iyo xadgudubyo kale oo culus kuwaasoo sii xumeeyey masiibada bani'aadminnimo ee waddanka haysata, sidaas waxa sheegtay hay'adda Xuquuqda Aadanaha ee Human Rights Watch warbixin ay maanta daabacday. Human Rights Watch waxay ugu baaqaysaa dawladda Maraykanka, Midowga Yurub iyo quwadaha kale ee caalamiga ah inay dib uga fiirsadaan hannaanka cilladaysan ee ay ku waajahayaan qalalaasaha ayna taageeraan dadaallada lagu xaqiijinayo xisaabtan dhaca.

Warbixintan oo ka kooban 104 bog, cinwaankeeduna yahay, "Cabsi Ciirsi La': Dambiyada Dagaal iyo Burburka Soomaaliya," waxay ka hadlaysaa sida ay xoogagga Dawladda Federaalka Ku Meelgaarka ah, Ciidamada Itoobiya ee faragelinta ku sameeyey si ay u taageerana dawladda inay si culus oo baahsan ugu xadgudbeen xeerarka iyo shuruucda dagaalka. Xadgubyada soo noq-noqday waxaa ka mid ah weerarro aan kala sooc lahayn, dil, kufsi, rayidka oo gabbaad laga dhigto iyo bililiqo. Tan iyo horraantii sannadkii 2007, colaadda sii huraysa waxay galaafatay nolosha kumannaan rayid ah, waxayna barakicisay in ka badan milyan qof, colaadaasoo inta badan magaalada Muqdishu ka qaxisay dadkii ku noolaa. Weerarrada sii siyaadaya ee lagu qaadayay shaqaalaha gargaarka sannadkii la soo dhaafay waxay si aad ah u xadideen hawlihii gargaarka waxayna culays ku kordhiyeen qalalaase bani'aadminimo oo soo kordhaya.

"Qaybaha dagaalamay ee Soomaaliya waxay dhibaatada ugu weyn u geystaan dadka rayidka ah marka loo eego khasaaraha iyaga ka dhexdhacay," sidaas waxaa tiri Georgette Gagnon, Agaasimaha Waaxda Afrika ee hay'adda Human Rights Watch. "Xalka Soomaaliya ma sahlana, laakiin dawladaha shisheeye waa inay joojiyaan gaaska ay ku sii shubayaan dabka iyadoo adeegsanaya siyaasadaha guracan ee awoodda siinaya kuwa ku xadgudbaya bini- aadanimadda.

Tan iyo sanandkii 1991-kii Soomaaliya kama aysan jirin dowlad dhexe oo shaqeysa, isla markaasna ciidamaddii nabad ilaalinta ee Qaramadda Midoobay waxay kasoo baxeen Soomaaliya 1995-tii iyagoo ku fashilmay. Tan iyo waqtigaas, Soomaaliya waxay ku sugnayd jaha-wareer iyo qalalaase. Bishii Diisambar 2006-dii, milatariga Itoobiya ayaa farageliyey Soomaaliya si ay u taageeraan Dawladda Ku Meelgaarka kana wada horjeeda Maxkamadihii Islaamiga oo markaas gacanta ku hayay maamulka magaaladda Muqdisho. Labadii sano ee ugu dambeeysay iska horimaadyada dagaalka waxay gaareen meel xun, iyadoo wada hadalada nabadda ee ay caalamku taageersan yihiin ayan ka soo bixin wax la taaban karo.

Warbixintani waxay ku fadhidaa waraysiyo lala yeeshay in ka badan 80 markhaatiyaal iyo dhibbanayaal iskugu jira oo si qayaxan faahfaahin uga bixiyey weerarrada ay qaadayeen dhinacyada dagaalamay.

Dhinac walba oo kuwa dagaalamaya ka mid ah, waxay si aan kala sooc laheyn u xabbadeeyeen xaafadaha ay dadka rayidka ah deggan yihiin ee magaalada Muqdisho, weerarradaasoo ahaa kuwo si joogto ah maalin walba u dhacayey, guryaha dhulka la simay, wax digniin ahna aan laga bixin, dadka rayidka ahna jidadka lagu dilayey. Xoogagga mucaaradka waxay qaadeen weerraro ku dhufo oo ka dhaqaaq ah, waxay waxyaabaha qarxa dhigeen waddooyinka, suuqyada, iyo

goobaha dadweynaha, waxayna hubka hoobiyaha ka soo rideen xaafadaha ay rayidku sida xooggan u degaan. Ciidamada Itoobiya waxay weerarrada mucaaradka kaga jawaabeen madaafiic iyo hubka aartileriga oo aan loo meel dayin kuwaasoo aafo burbur leh u keenay dadka rayidka ah.

Ciidamada amniga ee Dowladda Federaalka Ku Meelgaarka ah iyo maleeshiyada ay iskaashiga leeyihiin waxay gaysteen jirdil, dil iyo kufsi ka dhan ah rayidka waxayna bililiqaysteen guryahooda, iyagoo mararka qaarkood ugu soo gabbannaya hawlgal baadhitaan wadajir ah oo ay la sameeyaan ciidamada Itoobiya. Ciidamada Itoobiya oo anshaxooda ilaaliyey sannadkii 2007 waxaa si baahsan loo arkay iyagoo gaysanaya falal dambiyeed shaqaaqo ku dheehan tahay sannadkan. Ciidamada mucaaradku waxay u hanjabeen ayna khaarajiyeen dad rayid ah oo ay u arkeen inaysan qaddiyadooda la dhacsanayn waxayna si qasab ah ciidankooda u qoreen rayid ay ku jiraan carruur.

Sawirka buuxa ee xadgudubyadan fdoosha xun waxaa laga dheehan karaa sheekooyinka dadka Soomaalida ah ee dhibaatadu ka soo gaartay. Hay'adda Human Rights Watch waxay waraysatay gabdho dhalinyaro ah oo ay kufsadeen ciidamada nabadgelyada ee Dowladda Federaalka, waalidiin caruurtoodii cadcad u goo-gooyay madfac ku habsaday guriggii ay dagganayaan oo ay ku soo rideen ciidamada Itoobiya, iyo dad ay xooggaga mucaaradka ku toogteen jidadka iyagoo u dilaya waxyaabo aan xaqiiqadooda la salaynin  sida inay farriiimaha u qaadaan ciidamada Dawladda Federaalka Ku Meelgaarka ah. Wiil dhalinyaro ah ayaa sharraxay inuu arkay koox ka tirsna ciidamada Itoobiya oo kufsanaya hooyadiis iyo gabdho walaalihiis ah gurigooda dhexdiisa. "Aniguna waxba uma qaban karin," ayuu yiri. "Hooyaday iyo walaalalahay midna ma caawin karaynin."

Dad badan, dhibaatada ugu xun ee soo foodsaartay waxay ahayd inay dhexda u galeen saddexda dhinac ee iska soo horjeeda. Nin dhalinyar ah ayaa amar kama-dambays ah waxaa siiyey ciidanka xagjirka ah ee Al-Shabab isagoo ku sugan xaafadiisa, waxayna u sheegeen inuu ku soo biiro ama cawaaqib la kulmi doono. Maalmo kadib ayaa isaga oo ka soo laabtay iskuulka dhacdo ka duwan tan hore u qabsatay uu la kulmay hooyadiis oo la dilay iyo gurigoodii oo burburay kadib markii uu madfac ku soo dhacay.

"Adduun weynahu guud ahaan wuxuu iska indha tiray foolxumadda ka taagan Soomaaliya, waxayna dhibaatadu kalliftay in qoysaska Soomaalida ay waajahaan qalalaase sii kordhaya maalin kasta oo timaada," ayey tiri Gagnon.  "Xataa kuwii isku daya inay ka cararaan waxay la kulmaan xadgudubyada iyo dhibaatada oo daba socota."

Boqolaal kun oo rayid ah oo ka tirsan dadka ugu faqiirsan, oo aan haysan dhaqaalihii ay kaga fogaan lahaayeen dhibaatada, ayaa iskugu soo ururyay xeryaha buux dhaafay ee ay joogana dadka soo barakacay ee ku teedsan waddada isku xirta Muqdishu iyo Afgooye, waxaase halkaasi uga daba tagay dagaalka aan kala sooca lahayn ee ay ka carareen.

Tobonaan kun oo qof oo qaxooti Soomaali ah ayaa sidoo kale sannadkan ka cararay waddanka. Xerada qaxootiga Kenya ku taala ee Dadaab ayaa ah midda ugu weyn xeryaha qaxootiga ee ka jira adduunka oo ay ku jiraan ku dhowaad 250,000 oo qof. Laakiin sida xeradaas lagu soo gaaro lafteeda ayaa dhibaato ah. Human Rights Watch waxay waraystay qaxooti badan oo la boobay, la

kufsaday ama ay garaaceen maleeshiyo aan cidna ka amar qaadan markii ay ka sii cararayeen Soomaaliya. Xadka Kenya la leedahay  Soomaaliya waa xiran yahay, waxaana taasi badday in dadka qaxaya ay baylah u noqdaan dallaaliinta arxanka daran ee dadka soo gudbiya iyo booliis Keenya ah oo musuqmaasuq ah.

 Boqolaal Soomaali ah ayaa ku harqaday badda iyagoo isku dayayey inay ka gudbaan Gacanka Cadan una socda Yemen, sida bandanna waxay dhacdaa marka dillaaliintu ku qasbaan inay ka degaan doonyaha ama badda looga dhextago.

Dowladda Maraykaynka, Midowga Yurub iyo dawladaha gobolka tallaabooyinka ay ilaa hadda u qaadeen sidii wax looga qaban lahaa xaaladda sii xumaanaysa ee Soomalaiya waxay ahaayeen kuwo yar; sida bandanna waxay qaadeen tallaabooyinka xaalka sii xumeeyey.

Itoobiya waxay qayb ka tahay colaadda, balse ma jirto wax ay qabatay si loo xaqiijiyo xisaabtan ay la samayso askarteeda. Dawladda Maraykanka oo Soomaaliya u aragta rug uu ka socdo “dagaalka caalamiga ah ee argagixisada”, waxay wadatay siyaasad habqan ah oo ay ku taageerayso dawladda ku meelgaarka ah iyo tallaabooyinka Itoobiya, isla xisaabtan la’aanta ka dhalatayna waxay sii hurisay xadgudubyadii ugu xumaa inay dhacaan. Midowga Yurub waxay si toos ah ugu ololeeyeen in la kaalmeeyo ciidamada booliiska ee dawladda iyagoon dhinaca kalena ku adkaysan in tallaabo wax ku ool ah laga qaado hufista ciidanka iyo xadgubyada dagaal ee dhacay.

Bilooyinkii u dambeeyay, iska hor imaadyadii waxay ku faafeen gobollada deriska ah iyo waddamada iyadoo ay ka dhaceen qaraxyo iyo weerarro – kuwaasoo ahaa faragelintii Itoobiya ee 2006 ay inay ka hortagto. Bilihii u dambeeyey ee sannadka 2008 waxay qaraxyo ismaadaamin ah ka dhaceen gobollada hore amnigoodu u wanaagsanaa ee Somaliland iyo Puntland, iyo falal budhcad badeed faraha ka baxay oo ka dhacaya badaha iyo af-duubyo gaarsiisan ilaa xadka dalka Kenya.

“Dhibaatada Soomaaliya ma ahan keliya hurgumo u taala dadka Soomaaliyeed, balse waa halis goboleed iyo dhibaato caalami ah,”  ayey tiri Gagnon.  “Adduunka kama go’do inuu faraha ka laabto sidii loo heli lahaa qaab waxytar leh oo wax looga qabto.”

Human Rights Watch waxay ku baaqaysaa in xukuumadda Washington ay si qoto dheer dib ugu eegto siyaasadda ku aadan Soomaaliya iyo guud ahaan Geeska Afrika, maamulka horseedka uu ka yahay Obama wuxuu fursad u heli karaa inuu kaga gudbo siyaasadaha dhicisoobay ee ay wateen maamulka ka horreeyey iyo kuwa caasimada Yuruba. Hay’addu waxay ku baaqaysaa dhismaha Guddi Baadhitaan Qaramada Midoobay magacawdo oo baadhitaan ku sameeya xadgudubyada ka dhanka ah shurucda caalamiga, soo khariiradeeya tacaddiyada ugu xun, aasaasna u dhiga xisaabtan dhaca.

Si aad u akhrisatid wabixinta Human Rights Watch, *“*Cabsi Ciirsi La’*:* Dambiyada Dagaal iyo Burburka Soomaaliya,” fadlan booqo:
http://hrw.org/en/reports/2008/12/08/so-much-fear-0

Si aad u dhagaysatid xog-warranka qaxootiga Soomaalida oo maqal ah, fadlan booqo:
http://www.hrw.org/features/somalia